


# Ka duwanaanshaha sababta saxda ah



- LIDA Portugal ✎
  - Sunniva Høiby-Øiset ✎
  - Mohamed Abdirashid 📄
- 4
- Soomaali 🗨️



## LIDA Stories


[lidastories.net](http://lidastories.net)

# Ka duwanaanshaha sababta saxda ah


- LIDA Portugal ✎
- Sunniva Høiby-Øiset ✎
- Mohamed Abdirashid 📄



This work is licensed under a Creative Commons  
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).  
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>




Edson waxa uu ku dhashay Angola, wax yar uun ka dib markii uu dalkoodu xornimada qaatay. Wuxuu ahaa wiil aad u dheer. Dhererkiisa awgeed ayuu kuwa kale kaga duwanaa. Dadkii hubka siin jiray carruurta si ay ugu dagaalamaan askar ahaan dagaaladii sokeeye waxay doonayeen wiilal isagoo kale ah.




Hadda oo uu qaan-gaaray, Edson wuxuu tababaraa carruurta qaxootiga ah iyo kuwa kale ee laga takooro bulshada. Mar, dhererkiisu waxa uu halis galiyay in uu carruurta la askaraynayo noqdo. Hadda, dhererkiisu wuxuu siinayaa awood uu dadka kale ku caawiyo inay dareemaan ammaan.




Hooyadii waxay ka cabsatay inay  
kaxaystaan, markaas ayay go'aansatay  
inay u dirto inuu kula noolaado habaryarti!  
Portugal. Waxay u malaynaystay inuu  
halqaas ku nabadgelli doono.



Maalin maalmaha ka mid ah macalin ayaa  
ogaaday sida uu ugu fiican yahay  
kubbadda gacanta. Waxa uu ku biiray koox  
kubbadda gacanta ah oo uu aad ugu  
guulaystay. Waxa uu caan ka noqday  
iskoolka oo uu yeeshay saaxiibo. Wuxuu  
kalo noqday qof kalsooni badan.



Aad bay u adkeyd bilaawgii horre, maadaama Edson uu u xiisay cimilada diiran, cunta dhaqameedka iyo ugu badnaan, laabta gelintii iyo dhunkashada hooyadiis.



Si fiican ugumuu hadli karin luuqada Boortaqiiska, aad ayeyna ugu adkeyd inuu la socdo fasaladiisa iyo la sheekeysiga saaxiibadiis. Waxa uu iswaydiin jiray in ay tahay fikrad wanaagsan in uu yimaado Portugal.